



# Dabka ka Kaca Guryaha

**Dabka ka kaca guryaha inta ugu badan waxa sababa shil cunto karin, sigaar-cabis ama shooladaha xaabada lagu shido (woodstove) ama kululeeyeyaasha goob. Halkan waxa ku qoran waxyaabo aad sameyn kartid si aad uga baxsatid dab guri ama si aad naftaada u badbaadisid marka dab jiro.**

## Iska ilaalinta dabka

- Ku rakib qalabka digniinta qiiqa (smoke detectors) gudaha ama meel u dhow dhammaan goobaha la seexdo iyo dabaq kasta oo ah gurigaaga, oo uu ku jiro aagga hoose ee gurigaaga (basement). Si joogto ah u hubi qalabka digniinta qiiqa oo sannadkii laba jeer ka beddel baytariyada.
- Ha kuu yaalo qalabka dab-daminta oo noociisu yahay A-B-C (fire extinguishers). Bar xubnaha qoyska sida loo isticmaalo qalabkaas.
- Garo goobta ay ku yaalaan dhammaan meelaha laga baxo oo ay ka mid yihiin daaqaaduhu. Haddii aad ku nooshahay abaarman, tiri inta albaab ee u dhexeeya abaarmankaaga iyo labada irridood ee baxsiga ee ugu dhow.
- Garo laba siyaabood oo looga baxo qol kasta haddii qiiq ama olol uu kaa horjoogsado irrida baxsiga ee koowaad.
- Dooro goob kulan oo ah dibadda guriga.
- Sameyso qorshe baxsi oo ku tababarta adiga iyo qoyskaagu. Tani waxay gargaar ka geysan doontaa inaad dhakhso u baxdid marka aanuu jirin wakhti khalad lagu sameeyo.
- Qol hurdo oo kasta oo ku yaala daqaba sare ku hayso jaranjarooyinka isku laabma ama nooca silsiladda.
- Si ammaan ah, u isticmaal illo kul oo beddel ah, sida shoolad xaabo lagu shido ama kululeeyeyaasha goob:
  - Marna foornada gaas ku shaqeysa (gas ovens), shoolad gaas, baarbikiyuu, ama badi kululeeyeyaasha la qaadi karo ama kululeeyeyaasha ku shaqeeya “propane” ha u isticmaalin inaad ku kululaysid gudaha guriga.
  - Ka hor inta aanad isticmaalin illo kul oo beddel ah, akhri fariimaha shirkadda soo sameysay.
- Sigaar ha ku cabin qolka jiiifka, kursi-jiiifka ama meel kale oo kasta oo laga yaabo inaad seexatid adiga oo sigaar cabaya.
- Seexo iyada oo qolka huradaadu xidhan yahay.
- U hubso in lambarka gurigaaga si cad looga arki karo jidka iyo in baabuurta dab-damisku soo gaadhi karaan gurigaaga.
- Diyaar ha kuu ahaadaan alaabtaada la dagaalanka dabka: budo qallalan, qalabka dab-daminta, darbaal/shiraaq ama buste culus, iyo biyo.

## Haddii dab kaco

- Haddii dab jiro — ka qaxa ama ka baxa meesha. Dib ha ugu laaban gudaha. Adiga oo jooga guriga deriska wac 9-1-1.
- Marna biyo ha ku shubin dab koronto.
- Dabka saliidda iyo dufanka ee jikada ku bakhtii soodhaha khamiirka (baking soda) ama milix, dabool saar ololka haddii uu ka dhex ololayo digsi.
- Haddii qiiq ku xanibo — dhulka dhig gacmahaaga iyo jilbahaaga oo gurguuro; si tartiib ah uga neefso sanko oo maradaada, shaatiga ama jaakada u isticmaal shaandho ahaan.
- Haddii ay qasab kugu noqoto inaad dhex martid olol — isku xeji neefta, dhakhso u dhaqaaq, dabool madaxaaga iyo timahaaga, madaxaaga hoos u dhig oo isku xidh indhahaaga intii suurtoagal ah.
- Haddii dabku qabsado dharkaaga, “joogso, isku tuur dhulka oo is rogrog” ilaa dabku ka bakhtiyayo.
- Haddii aad joogtid qol oo aanad baxsan karin, albaabku ha xidhnaado, isu dhawee dhulka oo maro cad ama midab khafiif ah leh sudh dibadda daaqadda.
- U hubso in dhammaan xubnaha qoyska xaaladdooda la og yahay. Haddii qof maqan yahay, u sheeg waaxda dab-damiska.



PO Box 47890  
Olympia, WA 98504-  
7890

Bogga Internetka:  
[www.doh.wa.gov](http://www.doh.wa.gov)

360-236-4027  
(800) 525-0127

DOH Pub 821-029  
Somali